

Warbixin waalidiintal loogu talagalay:

Waalidiinta xaaladda carruurtooda ka walwalsan oo doonaayo in Maamulka adeegga bulshada wargeliyaan



Waalidiinta xaaladda carruurtooda ka walwalsan oo doonaayo in Maamulka adeegga bulshada wargeliyaan

Haddii shaqaalaha daryeel-caafimaadeedka ay ka shakisan yihiin, in qof carruur ah u ku sugan yahay xaalad aan wanaagsanayn, ama haddii cunugga iyo qoyskiisa ba u baahan yihiin caawinaadda iyo taageerada Maamulka adeegga bulshada, waxaa xaaladaas shaqaalaha waa-jib ku ah in ay Maamulka adeegga bulshada wargeliyaan, waajibkaas wuxuu ku xusan yahay Xeerka arrimaha adeegga bulshada, cutubka 14, qodobka § 1. Ujeedada wargelinta laga leey-ahay ayaa waxay tahay in la shaac-bixiyo haddii xilhaaycha xannaanadda/waalidka u baahan yahay taageero iyo caawinaad u ku guto waajibkiisa waalidnimada.

Wargelinta Maamulka adeegga bulshada waxay mar kasta ku salaysan tahay walwal xaa-ladda cunugga laga qabo.

Baahida wargelinta waxaa tusaale ahaan keeni karto, in cunugga aan la siinin waxa uu baahan yahay sida cillada xannaanadda, taasoo u sabab ah dhibaatooyin waalidiintiisa haysa-to. Waxay kalo noqon kartaa raashin-darro, nadaafadshaqsiyeed-darro, daawo iyo daryeelka caafimaadka ilkaha. Teeda kale, haddii cunugga loo geysto xoog-muqunis jirka ama maan-ka ku salaysan ama faraxumayn.

Haddii wargelin la helo iyo haddii kale ba, adiga iyo ubadkaaga ba waxaad xaq ku leedihi-in daryeel heer sare ah iyo soo-dhowayn wanaagsan.

Xarumaha daryeel-caafimaadeedka Gobolka Skåne waxaa ka hawlgala, la taliyeyaasha arrimaha bulshada kuwaasoo taageero wanaagsan laga heli karo, haddii aad doonaysaan inaad ogaataan waxa dhici doonoo wargelinta Maamulka adeegga bulshada kaddib. Xiriir la yeelanshada la taliyeyaasha arrimaha bulshada, waxaa idinka caawini karo shaqaalaha waax-da ama shaqaalaha rugta.

Haddii wargelinta ay xiriir la leedahay daryeel-caafimaadeedka cunugga, waxaa daryeel-caafimaadeedkiisa mas'uul ka ah shaqaalaha daryeel-caafimaadeedka. Maamulka adeegga bulshada waxaa xil-saaran baaritaanka arrinta. Haddii baaritaanka daryeel-caafimaadeedka kaddib aan la xaqiijin in cunugga dhibaato ama dhawaac loo geystay, waxaa lagu qori doonaa xasuus-qorka bukaan-socodka ee isaga u gaar ah, kaddib waxaa la wargelin doonaa Maamul-ka adeegga bulshada.

Haddii xannuunka waalidka dartiisa loogu dhaqaaqay wargelinta, shaqaalaha-na ay aaminsan yihiin in waalidka iyo ubadkiisa ba u baahan yihiin taageero, wuxuu waalidku sii wadanaaya daryeelkiisa. Kulanka ugu horeeyo dartiisa ayaa Maamulka adeegga bulshada ugu yeerayaa waalidka iyo ubadkiisa. Kaddib waxaa go'aan laga gaarayaa haddii loo baahan yahay in la baaro xaaladda cunugga iyo waxkaqabadyada loo baahan yahay. Shaqaalaha halka waa-lidka lagu daryeelo waa in waalidka iyo ubadkiisa ay siiyaan warbixin, talo iyo taageero.

Laga soo xigsaday Xeerka adeegga bulshada: cutubka 14, qodobka § 1:

Hay'adaha ammuuraha carruurta iyo dhallinyarada, iyo hay'adaha ammuuraha daryeelka buka-anka iyo caafimaadeedka, Maamulka adeegga bulshada, waxaa dhamaantood waajib ku ah in sida ugu dhaqsida badan ay wargeliyaan Guddiga arrimaha bulshada, haddii ay ka war helaan ama ay ka shakisan yihiin in qof carruur ah u ku sugan yahay xaalad aan wanaagsanayn



Wargelinta darteeda sidee wax u dhacaan?

Waxaa loola xiriira Maamulka adeegga bulshada ka hawlaga degmada u cunugga degan yahay.

Maamulka adeegga bulshada wuxuu marka hore ku dadaala in baaritaanka ugu ku dhaqaaqo wadajir cunugga iyo qoyskiisa.

Kaddib markii Maamulka adeegga bulshada la wargeliyo arrinta, wuxuu badi ahaan kulan awgiis u yeera cunugga iyo waalidkiisa. Kaddib wuxuu Maamulka adeegga bulshada go'aan ka gaara haddii baaritaanka xaaladda cunugga lagu dhaqaaqayo iyo in kale. Mararka qaarkood waxaa kulanka ka qaybgalo qofka wargelinta soo gudbiyay.

Haddii cunugga ama waalidkiisa isbitaal la seexiyo, waxaa mararka qaarkood waaxda isbi-taalka ku soo booqda gacanhaaye Maamulka adeegga bulshada. Ujeedada booqashada waxay tahay in xilhaayaha xannaanadda/waalidka xiriir loola yeesho, iyo in warbixin takhtarka iyo shaqaalaha laga helo.

Haddii Maamulka adeegga bulshada u baaritaan ku dhaqaaqo, wuxuu badi ahaan xiriir la yeesha rugta daryeel-caafimaadeedka carruurta, dugsiga xannaanadda ama dugsiga caadiga ah. Ujeedada waxay tahay in la helo muqaalka xaaladda jirta.

Mararka qaarkood Maamulka adeegga bulshada wuxuu isugu yeera kulan wada-tashi hay'adaha arrinta ay khuseeyso

Baaritaanka wuxuu ugu badnaantii qaata afar bilood. Natiijada baaritaanka waxay noqon kartaa in lays waydiiyo caawinaadda iyo taageerada cunugga iyo xilhaayaha xannaanadda/waalidka u baahan yihiin, iyo haddii cunugga u baahan yahay in la badbaadiyo. Natiijada baaritaanka waxaa la wargelin doonaa rugta daryeel-caafimaadeedka, waa haddii xilhaayaha xannaanadda/waalidka u arrintaas raali ka yahay.

Region Skåne
291 89 Kristianstad
044-309 30 00
Skane.se

